



Wir  
machen  
das. **ST.GALLEN**  
**IMPFT!**

Kanton St.Gallen  
Gesundheitsdepartement



**TALLAALKA COVID**  
**HADDADAN**  
**ISDIIWAANGELI**  
[www.wir-impfen.ch](http://www.wir-impfen.ch)

Magaalada Canton, St. Gallen dhammaan dadka  
waawayn ayaa iskugu diwangalin kara tallaalka  
Corona si bilash ah.



## ISKADIIWANGELINTA XARUNTA TALLAALKA.

Sida loo qaato balanta tallaalka ee Xarunta Tallaalka.

Haddii aadan heysanin internet, cinwaan iimayl, ama aad dhib ku qabto luuqadaha, ka dalbo dadka kale inay ku cawiyaan (qoyska, saxiibada ama dadka aad istaqaanan)



1. Booqo bogga internetka [www.wir-impfen.ch](http://www.wir-impfen.ch).
2. Guji „si aad iskudiiwaangeliso“
3. Isdiiwaangelinta: Geli magaca koowaad iyo magaca awoowga, cinwaan iimayl iyo lambar sireedka, kadibna guji „Register“ (“Isdiiwaangeli”).
4. Waxaad heli dontaa iimayl ku fari doona inaad xaqiijiso isdiiwaangelintaada.
5. Kadib markaad ku guleysato isdiiwaangelinta waxaad isku diiwaangelin kartaa ballanta tallaalka. Dooro xarunta aad go'aansatay in lagaa tallaalo (St. Gallen, Wil, Rapperswil-Jona ama Buchs) kadibna buuxi foomka isdiiwaangelinta.
6. Waxaa laguugu soo diri doonaa xaqiijinta isdiiwaangelinta iimayl ahaan. Hadda waxaad u diiwaangashan tahay tallaalka Covid 19. Waxaad ku heli doontaa taariikhda tallaalka imayl ahaan. Haddii taariikhda koowaad aysan kuu habbooneyn, waxaad dooran kartaa taariikh kale.

## ISKA DIIWAANGELINTA DHAQTARKA QOYSKAAGA

Waxaad sidoo kale iska diiwaangelin kartaa dhakhtarkaaga daryeelka aasaasiga ah. Shaqsiyaadkan waxaa lagu tallaali doonaa oo kaliya xafiska dhaqtarkooda daryelka aasaasiga ah:

- Dadka xasaasiyadda daran ku qaba daawooyinka ama tallaalada.
- Dadka qaba cudurada raaga.
- Dadka ku rajo weyn inay helan talobixin tallaal.
- Haweenka uurka ah.

## WARBIXIN DHEERAAD AH.

Horay miyuu Corona kuugu dhacay? Hadaba wuxuu jirkaaga yeeshay difaac ugu yaraan ila iyo 6 bilood waxaadna sugi karta 6 bilood in lagu tallaalo.

## MA QABTAA WAX SU'AAL AH OO KU SABSAN TALLAALKA?

Khadka warbixinta / lambarka telefonka: 058 229 22 33  
[support@wir-impfen.ch](mailto:support@wir-impfen.ch)

